
Ku Saleesan Sooyaal Run ah



DALJIRKII DAHSOONAA

SOYAALKA WAA TIXRAACA MUSTAQBALKA DHAW.

ABDULAHI ABDIKAFI ABDI

“Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane,

Dir dir la isu laayiyo intaan weerar daba joogno,

Ooy dumarku weerkii sitaan, danabadii waayey

Uu sida dureemada u yaal, meydku dibaddiinna

Wallee doogsan maysaan haddaad dunida joogtaane

Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane”

Abdullahi Suldaan Mohamed Timacade

ARAR

Mahad oo idil waxay u sugnaatey ilaahigii weynaa ee wax walba hoostiisa ahaadeen iyo Rasuulkeenii Suubanaa Naxariis iyo Nabad Gelyo korkiisa Ha ahaatee.

Qormadani waxaa kusoo gudbinayaa mid kamid ah soyaalkii dahsoona oo ay ummada Soomaliyeed ilowday ama lagu tilmaami karay kuwii lahaa mudnaanta u dagaalanka xoriyada ummada balse noqotay mid aan mudnaanteedii la siin.

Ummad waliba oo meel kunool waxa ay leeyihiin kuwo ay ugu yeeraan halyeeyo qaran ha ahaadeen kuwo ka dhiidhiyey gumaysiga jirida xun ama ha ahaadeen kuwo lagu qadariyo hawlo ay bulshada ay magac weyn kaga dhex kasbadeen, ummadaasi waxa ay sameesa wax lagu qadariyo abaalkii ay u galeen kuwa ay ugu yeeraan halyeeyada wadankooda hanoqoto inay u dhisaan taalooyin lagu xasuusto ama in ay taariikh ay ku dhigaan bugaag lana baro jilaalka danbe qaabkii geesinimada lahayd ay dalkooda ugu adeegeen.

Balse ummada qaarkii waxa mooda in ay noqotay kuwa horseedka u ah aasida dhaxalkooda hanoqoto luuqad ay ku mideesan yihiin ama katagista dhaqan ay lahaayeen amaba Duugista Xabaal wadareedka Sooyaalka.

Bilowga qormada waxaa kaga warami doonaa taariikh kooban oo ka dhacday gayaanka Soomaaliyeed taasi oo kuu noqon karta samme-faraha qormada, kadibna waxa kuusoo gudbin doonaa qiso xaqiiq ah ee ka dhacday gayiga Soomaaliyeed xiligii gumeysiga balse haatan ay ku dhawdahay mid la ilaaway.

Waa laga yaaba inaa qisadan horay u maqashay hadii ay qormadani ay noqon waydo sidaad umaqashay naf ahaantaada fadlan taasi maaha inaa aniga qaldanahay ama aad adigu qaldan tahay Sooyaalku hadbu wuu is rogaa balse ilaahay weyne ayaa ah mid xaqiiq walba dul taagnaa.



Taalada Daljirka Dahsoon

“Taalada Daljirka Dahsoon waxa ay astaan u tahay dhamaan wiilashii iyo gabdhihii Soomaaliyeed ee u huray naftooda iyo maalkooda dalkooda balse dahsoon waxa la dhisay 1960kii ku dhawaad lixdan sanno kahor”

Taariikh kooban

Bilowgii qarnigii 19aad (19th) waxa Dhulka soomalida iyo geeska Afrikaba diirad ku hayey wadamadii reer Yurub kuwaas oo boob ba'an ku hayey dalalka afrika ayagoo ukala ordayey kala gumeysiga ku dhisan mid mabda' mid diin iyo mid waliba bulsho, gumeystuhu dhulka waa uu yimid isaga oo cidna kala tashan waayo waxa uu isku arkayey itaal aan markaas loo babac dhigi karin waa tuu asagu aaminsanaaye, xil badan kadib gu' badan oo tagay taariikh badan ayaa qormatay hanoqoto mid baal dahab ah ka gashay bugaagta taariikheed ee ummada Soomaaliyeed sida halyeeyo seeda gooyey cadowgii ummada seeftana ula baxay inay sharafkooda iyo dhiigooda aan noqon mid hadba sidii ladoono laga yeelo, ragaasna waxa kamid nimankii darawiisheed ee la diriray shisheeyihii ku sugnaa degaanada soomaliyeed gulufkooduna wuxu aad ugu badnaa dhinaca waqooyiga kaas uu maamulayey guumeestihii Ingiriiska.

Dadku badankood waxay aaminsan yihiin in ingiriis uu Darawiish jabiyey balse jabkii ugu weynaa daraawiish waxa uu kasoo gaaray odayashii dhaqanka iyo wadaad xumihii barigaas wadaadka loogu yeerayey, Wadaad xumo markaan leeyahay waxa aan ula jeedaa nin wadaad sheeganaya hadana leh "Xalku waxa uu ku jiraa in ingiriiska in lala heshiiyo ,guumeystihii dhulka joogay aad ayuu u sahan saday dadka Soomaaliyeed asagoo hadba ka marayey dhinaca ay isku khilaafsan yihiin haba ugu weynaatee QABIILKA , waxa uuna aad u garawsaday dhinaca ay ka midoobi karaan waa Diintee.

Ingiriisku badankood markuu qolo wada hadal la galayo waxa uu iska hor marin jiray wafti isugu jira wadaado iyo odayaal qabaa'il ciidamadii gumeystaha ee joogay dhulalka Soomaaliyeed badankood waxa ay

isticmaali jireen siyaasada adeegsiga qabaa'ilada ayagoo hadba mabda'a ay wateen ay ahayd "Qeybi oo xukun" taas oo ay aad ugu guuleesteen

inay badankood gacanta ku dhigaan dhamaan dhulalka Afrikada madow, taasi waxa u dheerayd isku hor keenida qabaa'ila Soomalida iyagoo faa'ida weyn ku qabay hadii midkood uu soo jabo in uu hiil ama garab soo weydiisto Ingiriiska ayagana aad ayey ugu caawin jireen siinta hub iyo saanad milateri taas oo aad ugu sahashay inay ku fidaan dhulalka Soomalida.

Hadaan soo xigano mid kamid hadaladii taariikheed uu ka sheekeeyey Axmed Faarax Cali 'idaajaa' uuna kaga hadlayo dhaqan xumadii Soomaalidii gumeysi raaca ahayd ayaa waxa uu yiri "ingiriiska iyo Soomaalidii uu ku adeegan jirey ee uu dagaalka Sayidka u soo kaxaysatay waxay in badan ku eedeeyeen inuu wadaadku dhiigyacab ahaa oo aan sokeeye iyo shisheeye u kala soocnayn, ilaa maantana waxaa la helayaa dad badan oo soomaali ah oo ay weli maskaxdooda ku dambayso raadkii dacaayadda shisheeyaha iyo wadaaddadii Soomaalida ahaa ee sida tooska ah Sayidka ula muransanaa iyagoo soo dhaweysan jirey ingiriiska iyo wadadii masiixiga ahaa uu watay, balse waxa ayaan darro ah ilaa maanta iney jiraan qaar wali aaminsan raadkii xumaa ee gumeeystuhu dalka kaga tagay iyagoo wali ka been sheegaya taariikhyadii Darawiisheed.

Maamulkii gumeysiga iyo Soomaalidii ay isbahaysteeni markay eedda caynkaas ah Sayidka iyo Daraawiishta saarayeen ma xusi jirin duullaammadii iyo weerarradii colka iyo gaadahaba lahaa ee madax iyo minjo toona aan loo kala sooci jirin, xarumaha Daraawiishtana lagu soo qaadi jirey, ma ay xusi jirin raggii talada Sayidka la wadey ee maagga iyo sida gardarrada ah Fardhiddin iyo Jidbaale xabbadda loogu leefsiiyey, mana xusi jirin wixii ay xoolo dhaqeen ee Ingiriiska iyo dadkii ay wada socdeeni ay dhaca kula meeri jireen, ma ay xusi jirin inta jeer ee ay Sayid

Maxamed kaga oohiyeen, markay dhegta dhiigga u dareen boqollaal nin-door wada ah oo ay daraawiishi ku dhisnayd. Bal si ka-fiirsi leh u akhri meerisyadan kugu qasbaya inaad Sayidka la oydo oo aad dhankiisa ka soo jeesato:

- Eebbow geyiga oo dhan waa nalaga guulaaye
- Waa noo gedleeyaan dadkii gaalada ahaaye
- Eebbow Giriig kolay ku tahay nala gamuunneeye!
- Go'na lagama qaadine dulmay nagu gelaayaane
- Gabbaad kale hadday noo helaan waa gam'i lahayne
- Eebbow waxay nagu gabreen diinta soo gala e!
- Eebbow garka haddaan qabsaday gaaxshe nabaddiiye
- Eebbow gammaan iyo waxaan gini-cas dhiibaayey
- Eebbow garow kagama helin goolashadaan wadaye!
- Ganbalaaligii bay warmaha nagu garraaxeene
- Eebow waa gumaadeen raggii gaanaha ahaaye
- Eebbow waxay gebawareen Gaaguf iyo Xayde!
- Xirsigii garaaraha lahaa Gaarrufkii dilee
- Geydhaale Aw-Aadan bay galawga taabteene
- Eebow geesigii Ina-Dherey ugu guduudsheene
- Guxushaaga Baynaxa ilmadu waa tan gabaxlayne
- Gorroska Muuse-taaganaa wadnuhu ila gariiraaye
- Eebbow ways gamaamaa markuu gaarka soo maro e!

Meerisyadaas aannu soo sheegnay waxay ku jiraan gabayada Sayidka kuwa loogu jecel yahay mid ka mid ah, waa gabayga ‘Gudban’ amase ‘Gaalo-leged’ lagu magacaabo ee, aftahanimmada suugaaneed ka sokow, in badan inoo muujin karaya waayihii Daraawiishta iyo, xilligii isaga la tiriyey, welwelkii iyo hammigii hoggaamiyahooda. Waa meerisyo tusaale kaa siin kara dhibaatooyinkii Ingiriis iyo Soomaalidii horkacaysey ay Daraawiish u geysteen, rag wixii ay ka laayeen, gardarradii ay hadba ula iman jireen Soomaalidii uu had iyo goor xoolaha iyo lacagta ku miisi jirey siday ugu gacan-sayreen, qalbi murugeysan isagoo wada ah oo Eebbe-weyne u cabanaya ayuu kuu tawaawacayaa.

Waxaan ogsoonahay hadii la rabo in guumeyste la iska kiciyo maaha mid u bahaaan baryo ama in gacan hoos loo laadiyo, halgankii ugu horeeyey ay soomaali yeelatay ama ka hor yimaada gumeysiga jirida xun hanoqdo gumeysigii cadaa iyo kii madoobaaba wuxu ahaa halgankii uu gar wadeenka ka ahaa Abihii xornimada Somaliyeed ee SAYYID MAXAMED CABDILLE XASAN iyo Xertiisii Darawiisheed, labaatankii gu’ ee dagaalku gumaysiga iyo Daraawiish ka dhex socday waxaa dhacay wax weyn, dad wixii la laayey ama haasahaasihii ku lumay iyo duunyo wixii la dhacay ama daar burburay ama degel rogmaday, gabbal dhacay iyo waa beryey wixii guuto gelibaxaysay iyo faras wixii weerar u taagnaa, qalinna laguma qori karo, afna loogama sheekayn karo, lamana qiyaasi karo.

Jabkii Darawiisheed kadib gumeystuhu waxa uu moodayey in doonista xornimada ay halkaas ku ekaan doonto balse dhawr iyo toban sanno kadib waxa dhashay xisbigii Leegada ee SYL (Somali Youth League) iyadoo halkaas ka waday gurashadii mirihii ay beertay daraawiish, asaaska Leegada waxa hurdo la’aan hor leh ku riday gumeystihii fadhiyey mogadisho asagoo ka walaacsanaa bilowga daraawiish cusub wuxuuna ogsoonaa kumanaankii ingiriis ee ku baxay gulufyadii coladeed ee joogtada ahayd, inkastoo SYL ay si qarsoodi ah u shiri jireen balse Soomalidu kama aysan rajo dhigin soo ifbaxa halyeeyo cusub oo gumeysi

diid ah waayo soomaalida ma ahayn dad ku wanaagsan qaadashada amarada.

Shirkii iyo isku imaadkii ugu horeeyey ee SYL yeelato wuxuu ka dhacay qol ku yaalay wadadii “Via Roma” ee magaalada Muqdisho, shirkii kadib habeenkii taariikhdu ahayd 15kii Maajo 1943 ayaa Yaasiin Xaaji Cismaan soo hordhigay barnaamijkii Xisbiga oo ka kooban 13 qodob:

Qodobadaas waxaa ka mid ahaa:-

• In loo halgamo, lana xaqiijiyo Gobanimada iyo Madaxbanaanida Ummadda
Soomaaliyeed.
• In shanta Soomaaliyeed la mideeyo, hal maamulna la isugu keeno.
• In xoog la saaro tacliinta, siiba in lagu dadaalo waxbarashada dhallinyarada, iyadoo la aaminsanaa inaan horumar iyo madaxbanaani la gaari Karin
tacliin la’aanteed.
• In af Soomaaliga la qoro oo weliba la qaato farta Cismaaniyada, iyadoo fartaas loo arkayey inay tahay mid waddani ah.
• In shacabka lagu baraarujiyo halganka gobanimadoonka iyo madaxbanaanida.
• In la tirtiro caadooyinka iyo dhaqamada foosha xun ooy ka mid yihiin qabyaaladda, quursiga, iskala takoorka iwm.

Kadib waxay doorteen Hoggaanka Ururka, waxaana Guddoomiye loo doortay.

Cabdulqaadir Shiikh Sakhaawodiin – Guddoomiye
Xaaji Maxamad Xuseen – Guddoomiye-xigeen, halka Yaasiin Xaaji Cismaan loo doortay Xoghaye Guud, waxaa kaloo la go’aansaday inaan durbadiiba la soo bandhigin ulajeedada siyaasadeed ee Xisbiga ilaa iyo

intuu ka hanaqaadayo, sidaas daradeed, waxaa Xisbiga loo bixiyey magaca ah “Somali Youth Club” ama naadiga Dhallinyarada Soomaaliyeed, waxaa sidaas loo yeelay in Maamulka Ingiriiska loo tuso Xisbiga inuu yahay naadi dhallinyaro oo u go’an arrimaha bulshada iyo dhaqanka si looga gaashaanto carqalad iyo tacaddi ka imaan kara xaggiisa.

Subaxdii 15 Maajo 1943, waxay tageen xafiiskii Dhiinsiga Ingiriiska, iyagoo wata codsigii (petition) lagu dalbayey ruqsada naadiga, kadib waa loo ogolaaday,Muddo yar ka dib, xisbigu wuu xoogeeystay waxaa ku soo biiray taageerayaal aad u farabadan oo mutadawiciin ah waxaa cirka maray magaciisa iyo maqalkiisa, gobollada iyo degmooyinka waxaa ka yimid farriimo taageero ah iyo codsi ay ku cudsanayaan in isbiga loo furo, waxaa moodaa in shacabka Soomaaliyeed sugayey dhawaaqa oo keliya, waxaana laga bilaabo 1943, waxaa xisbiga laga furay gobollada Soomaaliya oo idil, isla mara ahaantaas, waxaa si lixaad leh u batay taageerayaashiisii ooy ku dhan yihiin qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed sida dhallinyarada, odayaasha, culimada, dumarka.

Bishii Maajo 1947 ayaa waxaa la go’aansaday in isbeddel lagu sameeyo magaca Xisbiga, lana muujiyo awoodiisa, sababahaan soo socda awgood:- Xisbiga oo xidideeystey oo shacabka dhexdiisa ka kasbaday kalsooni aan la loodin Karin, damaca gumeeystayaasha. Ingiriiska oo ka dhawaajiyey inuu rabo in Soomaaliya oo idil loo dhiibo iyo Talyaaniga oo u xusulduubayey in la soo celiyo maamulkiisii, iyo Axsaab Soomaali ah oo ku saleeysan hab qabiil, gacansaarna la leh quwadaha shisheeyaha oo Xisbiga laga horkeenay.

Galab ayaa Xisbigu qabtay shir lagu cusamay Soomaali iyo Ajnabiba, waxaana halkaas khudbad ka jeediyey isagoo ku hadlaya magaca xisbiga Yaasiin Xaaji Cismaan oo ku dhawaaqay in xisbiga loo bixiyey Somali Youth League (SYL) uuna yahay Xisbi siyaasi ah oo dagaal ba’an kula jira

gumeeysiga, balse ayaamo ka dib amar Ilaahay waxaa aad u xanuunsaday Yaasiin Xaaji Cismaan xanuunkaasi oo ahaa Duumo (malaria), Yaasiin wuu dardaarmay ka dib markuu dareemay in jirradiisu tahay mid halis ah wuxuu ka dardaarmay in jagada Xoghayaha Guud loo dhiibo Cabdullaahi Ciise Maxamuud oo madax ka aha faraca Xisbiga ee Beledweyne ayna wada shaqeeyn jireen, wuuna aqbalay taladiisii Maalmo ka dib Yaasiin wuu geriyooday Allaha u naxariistee.

Cabdullaahi Ciise Allaha u naxariistee meeshii ayuu hawshii ka sii waday wuxuu ugu adeegay Xisbiga iyo Shacbigaba si naftihurenimo ah, daacad ah, Soomaalinimo, wuxuuna guulo ka soo hoyey gudahaba iyo dibeddaba. Cabdullaahi wuxuu noqday Raiisulwasaarihii ugu horreeyey ee Soomaaliyeed sanadkii 1956.

Bilowga Sooyaalka Daljirkii Dahsoonaa

Halkani waa koonfurta Soomaaliya ,xiligu waa xagaa, goobtuna waa baadiyaha gobolka Gedo gaar ahaan webiga Jubba, waa inta u dhaxeesa Buur-Dhuubo iyo Baardheere oo qiyaastii isku jirta 94 kiiloomitir (94km) oo waqtigaa loo yaqaan dhulka Somaalida ee Talyaaniga, jawiga waa rajo ku joog balse aanan ahayn mid aad u wanaagsan maadaama guumeysigii aad u raagay lana sugayey waqtiga uu ninka Soomaliga ahi uu talin karo ama wax tusaaleyn karo, dadka waa wada danyar ku hoos jirta gacan guracan oo shisheeye iyo in kabo qaad u ah,Talyaanigu waxa uu aad ugu faa'ido qabay dhulka webiyada leh, asagoo ka tabcan jiray wax soo saarka beeraha kadib u iib geen jiray dalkiisa, wax soo saarka dhirta ayaa aad ugu wanaagsanaa dhulalka ay maraan webiyada Jubba iyo Shabeelle iyadoo Talyaaniga waxyaabihii uu aadka u dhoofin jiray ay kamid ahaayeen mooska, liinta iyo miraha kala duwan ee kasoo go'a beeraha ku yaal gayigeena Soomaliyeed.

Iyadoo jawiga degan yahay ayaa ciidan talyaani ahaa oo aagaas xero uga dhisnayd loo soo diray taar sheegaya inay muqdisho dib ugu soo noqdaan si dib loogu qaado Roma oo ahayd caaasimadii talyaaniga , ciidanka ayaa bilaabay dib u rarid ay uga anbabaxayaan dhulka ayagoo sii sameeyey "amministrazione locale" oo ahayd maamulka degaanka si ay usii hayaan hogaan degaankaas iyagoo awaamiirta sarre ka qaadanaya qolyihii waqtigaa Muqdisho fadhidey ee ahaa hogaankii Talyaaniga u qaabilsanaa dhulka Soomaliyeed.

Iyadoo arrinkii dib u celiska ciidanka socdo ayaa mid kamid ah ciidankii Talyaaniga ahaa is af-dhaafeen nin Somali ah oo marka deegaanka ahaa, ninkii Talyaaniga ahaa dharbaaxo ayuu kaga soo qaaday asagoo ku eedeeyey amar diido, Carro aad u daran ayuu qaaday ninkii Soomaliga ahaa kadibna toorey markaas u xirnayd ayuu si kadis ah ugu dhuftay askarigii talyaaniga ahaa kadibna waxa uu u cararay dhinaca duurka ah ee magaalada asagoo ogaal u ahaa hadii talyaani uu gacan ku dhigo inuusan naf uga tageyn, waxa uuna go'aansaday inuu duurka ku jiro ilaa ciidanka ay deegaankaas ka bixi doonaan.

Markii ay fariintii u timid saraakiishii sarre ee ciidanka waxa amar lagu bixiyey ina si degdeg ah gacanta loogu soo dhigo ninkii falkaa geystay lana soo taago sharcigii gumeysiga, ciidanka aad ayey u baaadi goobeen balse waa ay waayeen waxa ayna dadkii deegaanka u balan qaadeen abaal marin qofkii nolol ama geeri ku keena eedeesanahaas balse dadkii deeganka aad ayey uga dhaga adeegeen in ay soo jaajuusaan qof Soomali,dadaal dheer kadib Saraakiishii Talyaaniga waxa ay amar ku bixiyeen in ciidanka aan la rari doonin inaa lasoo qabto gacan ku dhiiglihii falkaas geestay, Ummadii deegaanka waxa ay kunoqotay musiibo cusub oo dhalatay maadaama la sugayey bixitaanka waxa hada iyo kow u bilowday waa' aysan maleesaneen, hase ahaate dadkii deegankana kamaba raad qaadin sii joogistooda halka talyaanigu uu islahaa hadaad joogto waxa ay ka doorbidayaan inaan tagto oo waxa ay kuusoo gacan galinayaan ninkii aad dooneysay balse siday rabeen ma dhicin.

Dhawr maalmood markii lajoogay aysana wali ku gacan dhigin raadkii ay daba joogeen waxa ay badaleen qaabkii hore ee soo qabashada danbiilaha meeshii ay soo qabashadiisa ama dilkiisa lacag ku bixinayeen ayey joojiyeen waxa ayna soo xirteen qaar kamid ahaa dadkii markaa deegan ku noola kuwaasoo xaadir ahaa maalinkuu falka dhacayey kadibna waxa ay isugu yeereen dadkii dagnaa deegaankaas, waxa ayna bilaabeen inay marsiiyaan jirdil aad u daran ayagoo ku hordilaya meeshii ay dadka isugu yeereen waxa ayna uga dhigneed inay dadka deegaanka tusaan halka xaalka sarakiisha ka taagan yihiin, markii ay jirdileen ayey ku hor daldaleen shacabkii hortooda ayagoo ku eedeeyey inay qayb ka ahaayeen falkii lagu dilay askarigii Talyaaniga ahaa.

Sheekada iyadoo halkaa marayso ayaa waxa goobta soo gaaray nin reer guuraa ah oo aan ahayn dadkii markaa degankaa joogay balse deegaanka ugu soo leexday arrimo u gaar ah, waxa uu indhaha ku dhuftay dhawr ruux oo Soomaaliyeed oo ku daldalan goob fagaare ah iyo dhawr niman oo cadaan ah meel aan ka fogeen ay sigaar ku cabayaan, asagoo anfariirsan ayuu hadalka ku boobay dhawr odayaal ah oo agtaagnaa “War sootii ciidanka ay bixi lahaayeen, teeda kalena wiilashan Soomaaliyeed maxay geesteen uu saas ugu galay gaalkani cad”.Kadibna waxa looga sheekeeyey siday xaalada u socotay, asagoo yaaban ayuu ka tagay goobta waxa uuna iska sii watay socodkiisii ku wajahnaa goob u markaas rabay inuu dhawr neef u iib geeyo goobtana waxa ay u jirta labo caano-maal (Labo maalmood iyo Labo habeen).

Muddo toddobaad ah kadib ayuu ninkii reer guuraaga ahaa kusoo laabtay degaankii asagoo soo dhameestay hawshiisii balse markan waxa uu la kulmay arrin tii horre ka mug weyn, markani waxa uu yimid goobtii dadka lagu daldalayey oo dad kuwada shumuumsan yihiin waxa uu fajacay markuu arkay arrin aad uu uga argagaxay markani waxaa la daldalay tiro labo jeer ka badan kuwii uu horay u arkay balse toogan ay haween ku jiraan, aad ayuu uga xanaaqay waxa uuna ku jeestay niman meesha tuunsanaa uu ku yiri " Wajigiin gubaye inaad iska dhicisaan daaye ma usoo daawasho tagteen qaabka uu hoyooyinkiin u daldalayo gaalkan cad". Mid kamid kuwii meesha taagnaa baa ku jawaabay "toddobaadkan saan baa dadkii laga shakisanaa inay wax isku yihiin ninkii baxsaday ama qaraabo yihiin loo daldalayey".

Intuu yaabay buu fahmay maalinkuu tagay ilaa uu soo laabanayey in dad ku dhow Siddeetan ruux la daldalay (80 qof), asagoo amakaag ku dhacay ayuu reerkiisii ku laabtay ugana sheekeyay wixii ka qabsaday deegaanka, sheekada sidii ugama harin oo habeen iyo malinba waxa ay ku riday hurdo la'aan waxaana u sawirmayey dadkii dumarka ku jiray qaabkii xumaa ee loo daldalay waxa uu aad uga cantoobay dadkii degaanka degenaa asagoo la yaaban qaabka ay u noqdeen rati uu guumeysiga hayaanka u hayo, aad ayuu u fekeray waxa uuna naftiisa ku canaantay inay ummadiisa badbaado u baahan tahay laguna fiirsan karin Ummad maalinba intaa la rabo laga deldalayo loona kala sooceyn waa ciyaal iyo waa dumar,

maadaama dhaqanka Soomaalida ay bir ma geydo xagooda ka yihiin.

Subixii danbe markuu waaga baryey ayuu sahaydiisii qaatay waxa uuna socdaal dheer u galay deegaankii daldalka, dhawr caano maal kadib waxa uu soo gaaray meeshii mise wali sidii ayuu dilkii usocdaa, waxa uu raadiyey odaygii degaanka isinka u ahaa markii loo geeyey ayuu ku yiri “ma tahay mid la isku haleen karo maadaama uu garkaaga cadaaday oo aad tahay qorax casar joogta” sababtoo ah waxa uu ka baqayey armuu odayga degaanka naf ahaantiisa ku jaajuusa, balse odaygaa ayaa aad usoo dhaweeyey una sheegay in xitaa asaga wiilkiisii uu ku jiray dadkii talyaanigu uu daldalay.

Ninkii reer guuraaga ahaa waxa uu yiri “Meeshani waxa imid ilaa saddex goor iyadoo waliba webi dhiigle ah dadkana aan loo kala soceen waa haweeen iyo waa heblaayo, markaan weydiyeyna waxa la ii sheegay in hal askari oo gaal ah loo dilayo dhawr iyo siddeetankaas qof, aniguse waxa aan lasoo dardaarmay reerkeygii waxa aana u sheegay wax waliba aan kuu sheegi rabo waxa aan kaga soo tagay Aabahay iyo walaalahay, maanta hadaa awoodo inaan Talyaani dagaal la galo boqol iyo ka badanba godkii aakhiro baan u diri lahaa balse itaalka ma lihi, laakiin maanta waxa awoodaa inaan badbaadiyo hooyin Soomaaliyeed uu gaalkas cad si xaq darro ah ku deldeli lahaa, waana inaa ani ii dhiibtaan Talyaaniga iguna buuxisaan booskii ninkii la raadinayey kuna tiraahdaan ‘waa kanaa ninkii gacan ku dhiiglaha ahaa’ si aan u badbaadiyo dadka maalin walba lanugu hor daldalo”.

Odaygii oo yaaban ayaab cabaar dhulka hoos u fiiriyey waana uu ka diiday dalabkii ninka, asagoo ka baqaya nin aan denbi lahayn inuu dhaho denbi buu leeyahay, dood dheer kadib odaygii waa uu ka aqbalay dalabkii.Galabtii markii la gaaray ayey u tageen xaruntii maamulka gumeysiga waxa ayna u sheegeen hawshii waxa la xiray ninkii reer guuraaga ahaa, xarigiisii kadib waxa la fasaxay koox beri oo kale dil ku xukuneed waxaana magaaladii oo idil la ogaysiiyey inay beri fagaaraha isugu soo baxaan dhamaan mid yar iyo mid weynba.

Subixii markii waagu baryey dadkiina ay soo wada xaadireen ayey soo sareen ninkii reer guraaga ahaa oo ay xalay oo idil jirdil ku wadeen, waxa uuna gabay socodkii oo idil oo la hayey garbaha waxaana jaaha wajigiisa ka muuqday dhaawacyo aad culus waxa ay soo dul istaajiyeen goobtii daldalka kadibna ay qoorta kaga xireen xarigii lagu daldali lahaa, askarigii daldali lahaa oo agtaagan ayaa la hadlay waxana u turjumaanayey mid Soomali ah waxa uuna ku yiri denbigaada waa soo qiratay ee dardaaran ma reebeysa waxa ninkii reer guuraaga ahaa ku jawaabay “Dardaarankeyga Ilaahay ayaa ku reebay ee adiga iyo gaalo raacyada kale kuma reeben”,cabaar kadib waxa la bixiyey amarkii dilka waxaana lugaha loo siibeyey ninkii, daqiiqado kooban ninkii reer guuraga ahaa halkaas ayuu ilahaygiisii weynaa ku ooftay kuna dhintey, muddo yar kadibna ciidankii talyaaniga ee dhulkaas joogay waa ay ka baxeen balse waxa dadka quluubtoodii ku haray halyeeygii badbaadiyey kunka nafood ilahay kasakoow, waxa uuna noqday midkii dhiigiisa u huray dadkiisa iyo diintiisa.

Gunaanadka Qormada

Dhamaan qormada iyo qaabka ay u dhacdey qisada waa mid aan idinku soo gudbiyey si naf ahaanteyda, Waa ay dhici kartaa inaan si kale u maqasho sooyaalkan waa ay kala duwanaan karaan goobaha aad ku maqashay inay ka dhaceen balse tan waa habkii naf ahaanteyda la igu soo gudbiyey.

Qaar kamid erayada Qormada ku jira waa ay dhici kartaa inay qaldamaan ama eenan usoo gudbin qaabkii naxwaha Af-Soomaliga amaba waxa dhici karta inaadan fahmin qaar kamid ah erayada ku jira qormada kala duwanaanshaha lahjadaha dartood.

Waa aad nala soo xiriiri kartaa hadaa ogtahay qaabka ugu saxsan ee sooyaalkan uu u dhacay adigoo tixraacaya meerta emaylka aan soo galin doono boga xiga.

Sooyaalka ummadi waa tixraaca mustaqbalka dhaw, waa mid ay bulshadaas kaga cabir qaataan waayihii dooga iyo waayihii dhiiga, bulsho walba oo meel joogtaa waxa ay leeyihiin kuwo lagu tilmaamo halyeeyada dagaalka kuwaas oo badankood loo dhiso taalooyin iyo wax yaabo kale oo wali lagu xasuusto, balse waxa jira boqolaal ayagana ah halyeeyo dagaal hanoqdeen kuwo naftooda u huray ama kuwo maalkooda u bixiyey danaha ummada iyo diinta,daljiro badan oo dahsoon iyo kuwa muuqdaba waxa ay ummada ka istaahilaan inay xusaan waayohoodii nololeed ee kaga aadaneed qaybtii weyneed ee ka qaateen bushada ee hadba ay la nool yihiiin.

Intaad noqon lahayd shisheeye kalkaal noqo mid dadkiisa ay xusi doonaan.

Skåne, Sweden

Malmö 214-41

2021 uppkomst

001-Q1-AK01

Du kan ta all upphovsrätt utan tillstånd, Du hittar publikationen på utskriftssidan i Malmö bibliotek.

Dhamaan qormadan waa isticmaali kartaa bilaa fasax, Daabacaada waxa ka heli kartaa boga Maktabada Malmo.

Kontakta mig / Nagala soo xiriir :-

abdullahkaafi@hotmail.com

"Mahad oo idil ilaahay bey u sugnaatay"

Abdallah Kaafi's PEN

SINCE 2016